

# **Siyaasadda JJ- Hawlaha Ardayga (Manhajka iyo Hawlaha manhajka ka baxsan)**

Hawlaha manhajkaka baxsan waxaa ka mid ahaan doona kuwan soo socda:

1. Hawlaha uu dugsigu-maalgeliyo ee u baahan maareynta ardayda dhanka ka ah ee maalinta dugsiga caadiga ah
2. Hawlaha uu dugsigu-maalgeliyo kuwaasi oo dhaca xilliga dugsigu uu jiro laakiin ka dhaca meel ka fog dhismaha dugsiga
3. Hawlaha wadajirka ah ee Dugsiyada Dadweynaha Denver ka dhaca ee aan ka ahayn barnaamijka ciyaaraha ee Dugsiyada Dadweynaha Denver iyo marxaladooyin kale ee ka mid ah barnaamijkaa madadaalada

Dhammaan siyaasadaha dhaqanka ardayga iyo anshaxa waxaa lagu dabakhayaa hawlaha ka baxsan manhajka.

Maamuleyaasha iyo macalinka maalgeliyaasha hawlaha manhajka ka baxsan ayaa samayn doona qawaaniin xaddidan oo qoran ee ku saabsan hawlaha manhajka ka baxsan ee dhismo kasta. Ardayda iyo waalidiinta ayaa lagu wargelin doonaa qawaaniinta ku saabsan hawlaha manhajkaka baxsan.

Qawaaniin qoran oo xaddidan ee xukumaya hawlo gaar ah ee ka dhaca dugsiga gudihiisa sida kuwo sharciga ah ee isla socda waa in ay sameeyaan maalgeliyaasha dugsiga iyo wakiilka maamulaha.

Dhammaan hawlaha manhajka ka baxsan waa in ay noqdaan kuwo si toos ah u hoos imaanaya maareynta shaqaale sita shahaado kaasi oo u shaqeeya Dugsiyada Dadweynaha Denver.

Shaqaalaha sita shahaadada iyo kuwa kale ee maalgeliyay hawlaha manhajka ka baxsan waxay matalayaan awoodda iskuulka, ardaydana waxay u hoggaansamayaan amarkooda.

Shaqaalaha shahaadada sita iyo kuwa kale ee maalgeliyay hawlaha manhajka ka baxsan ayaa gudoomi doona mas'uuliyada taageerida iyo sii wadida siyaasadaha iyo qawaaniinta dugsiga iyo Dugsiyada Dadweynaha Denver. Macalimiinta iyo kuwa kale ee maalgeliyay hawlaha manhajka ka baxsan ayaa damaana qaadi doona samaynta go'aano macquul ah oo xirfadaysan taas oo taageeri doonta maamulaha shaqaalaha.

Go'aanada khuseeya ka reebida hawlaha noqoto mid kelinimo ah ama mid kooxo ah waxaa lagala hadli karaa shaqaalaha shahaadada sita ama maalgeliyaasha kale iyo maamulaha. Go'aanadan oo kale waxaa la samayn karaa shuruudaha la xariira khatar wayn oo dembi ah. Anshaxa u baahan ficil dhakhso ahna waa in ay noqotaa mas'uuliyada shaqaalaha shahaadada sita ama maalgeliyaasha kale, ficilkana waa in uu muujiyaa xukun macquul ah oo xirfadaysan.

La Ansixiyay 7 Maajo, 1965

La muraajaceeyay 20 Agoosto, 1976

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JIC, Dhaqanka Ardayga, iyo lambarada sirta ee bedelka ah

JK, Anshaxa Ardayga, iyo lambarada sirta ee bedelka ah